**Xeer, 11 Maarso 1959, lamba. 2 diw.**

**Oggolaanshaha xeerka Qaybta Madaxabannaan, ee xagga ammaahada muddada dhexe iyo muddada dheere ee ka jirta "bangiga Ammaahda soomaaliyeed".**

## MAAMULUHU

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1 "Dhisidda Xukuumadda Soomaaliya;

Markuu arkay Xeerka 18 Maajo 1956, lamba. 78 "Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya";

Markuu arkay sharciga 30 Setembere 1956, lamba. 10 "Ballaarinta Howlaha Bangiga ammaahda Soomaaliyeed;

Markuu arkay xeerka 18 Feberaayo 1959, lamba. 5800010, ee borot., oo dhisaya qaybta Madaxabannaan, ee ammaahda muddada Dhexe iyo muddada Dheer; ee "Bangiga Ammaahda Soomaaliyeed";

Markuu Aqoonsaday baahida loo qabo in lagu dhaqaaqo oggolaanshaha (ansixinta) Xeerka Qaybta Madaxabannaan, ee xagga ammaahda muddada Dhexe iyo midda Dheer (fog);

Markuu Dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Kaddid soojeedinta Wasiirka xagga Dhaqaalaha;

## WUXUU XEERAYAA

Waxaa la oggolaaday halkan ku lifaaqan Xeerka Qaybta Madaxabannaan, ee Ammaahda muddada Dhexe iyo muddada Dheer, ee xagga "Bangiga Ammaahda Soomaaliyeed", sí waafaqsan qoraalga halka ku dheggen, oo uu saxiixay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Muqdisho, 11 Maarso 1959.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

Wasiirka Kowaad

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

KU-SIMAHA Wasiirka Arrimaha Dibedda

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

Waa arkay  waana Diiw. – Diiw. lamba. 15, xaashi lamba. 160.

Muqdisho, 13 Maarso 1959.

Hantidhowraha: **Spadaro**

**Xukuumadda Soomaaliya**

**Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha**

**Xeerka Qaybta Madaxabannaan, ee xagga Ammaahda Muddada Dhexe iyo Mudda Dheer (Fog) oo laga furay Bangiga Ammaahda, ee Xeerka (Sharciga) Guud "Bangiga Ammaahda Soomaaliyeed",**

**Qod. 1**

Qaybta Madaxabannaan, ee xagga ammaahda Muddada Dhexe iyo Muddada Dheer oo lagu dhisay Xeerka 18 Feberaayo 1959, lamba. Borot. 580010 oo laga unkay Bangiga ammaahda, ee xeerka Guud "Bangiga Ammaahda Soomaaliyeed", waxa ay leedahay shakhsiyad sharci, ee u gaar ah, hanti u gaar ah, oo leh maamul gaara, waana mid lagu dhaqayo qodobbada xeerka lagu dhisay.

**Qod. 2**

Muddada Jiritaanka Qaybtu waa mid aan Xaddadnayn.

**Qod. 3**

Ujeeddada Qeybtu waa in la dhiirrigeliyo oo la maalgeliyo mashaariicda horumarinta dhaqaalaha ee dhinaca warshadaha - beeraha, ee Dhulka gudahiisa, gaar ahaan kuwa ku hawlan ka shaqeynta wax-soo-saarka beeraha, xannaanada xoolaha iyo kalluumeysiga, iyo sidoo kale beerista iyo meeleynta ganacsiga cudbiga dunta dheer. looska, sisinta, babayga, liinta, yaanyada iyo dalagyada liinta ku eyniga ah iyo waliba fooxa.

**Qod. 4**

Qeybtu waxay ku dhaqaaqaysa hawl-qabadkeeda amaahbixinta, ayada oo u-adeegsanaysa:

a) — hantideeda gaar ah;
b) — sugaalka khasnaddeeda;
c) — lacagaha laga helo amaahda muddada-dheer ay bixiyaan xataa Hay'adaha Caalamiga ah.

**Qod. 5**

Amaahaha waxay qaadan karaan muddada ugu dheer,
ee ah illaa 15 (shan iyo toban) sano waxaana lagu bixinayaa hawlgal kasta oo maalgashi oo la xiriira gadashada, soo-dejinta iyo rakibaadda alaabada iyo qalabka iyo adeegyada lagu bixinayo hirgelinta mashaariicda ku xusan qodobka 3aad.
Sicirka dulsaarka firfircoon waxa lagu goynayaa, iyadoo hadba ku xiran mudada uu soconaya, nooca iyo halista macaamil ganacsi, 6% sanadkiiba ugu yaraan, ilaa ugu badnaan 7% sanadkiiba.

Amaahaha waxaa lagu kaabayaa diiwaangelin rahaneed, ee derejada kowaad ama rahan la geliyo shaqada, qalabka, saanadda iyo wixii dalagyo la soo saaro bishardi in ayagaas aysan saarnayn wax dammaanaad kale ah oo xagga waajibaadka deymeed. waxaana lagu bixinayaa sí ku saleysan mashaariicda, oo la dokumenti laga sameeyey oo ka horna ay xaqiijiyeen farsamo-qaanno ay qaybtu ku kalsoon tahay.

**Qod. 6**

Hantida Qaybta waxay ka kooban tahay:

a) laga bilaabo sanduuqa hibada ee So. 1,000.0000 oo lagu bixinayo iyadoo lagu saleynayo qodobada ku xusan wareegtada aasaaska;
b) wixii tabarucaad dheeraad ah ee ay bixiso Dowladda Soomaaliya;

c) tabarucaad aan dib loo bixin karin, tabarucaad, dhaxal iyo deeqsi nooc kasta ha ahaadee;
d) ka timaadda tabarucaadka ama maal-gashiga sinnaanta ee Hay'adaha kale ee daneynaya horumarinta dhaqaalaha ee dhinacyada warshadaha iyo beeraha;
e) laga helo sanduuqa keydka.

Wax ku biirinta iyo saamiyada ka imanaya Hay'adaha kale waa in ay ansixiso Wasaaradda Arimaha Dhaqaalaha, ka dib markii ay ka hesho fikrad wanaagsan Guddiga Kormeerka, ka dib markii ay la tashatay Golaha Wasiirada, kana badnaan karin 49% hantida Qaybta.

**Qod. 7**

Qeybtu waxay la wadaagtaa Bangiga Amaahda Soomaaliyeed xubnaha soo socda:

a) Golaha Maamulka;
b) Guddiga Fulinta;
c) Hantidhawrka Sharciga;
d) Agaasime;

Ayada oo ay wehliyaan awoodaha uu qeexayo uuna nidaaminayo Xeerka aasaasidda Qaybta iyo Xeerka la xiriira.
Xagga wixii sí gaar ah loogu dhex qeexay Xeerka aasaaska Qaybta iyo Xeerkan , waxaa lagu dhaqayaa xubnaha qudhooda axkaamta ku jirta Sharciga 30ka Setember 1956, ee lamba. 10 iyo Xeerka 30ka Setember 1956, ee lamba. 95 diiw.

**Qod. 8**

Guddoomiyaha iyo agaasimaha Bangiga Amaahda Soomaaliyeed waxa ay yihiin sida ay u kala horreeyaan Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Qaybtaa, iyagoo leh awoodaha matalaadda ay horay u qeexay Xeerka Bangiga Amaahda Soomaaliyeed.

**Qod. 9**

Qaybtu, sí ay u fuliso hawlaheeda, waxa ay adeegsaneysaa adeegyada Bangiga Amaahda Soomaaliyeed, ayadoo Bangiga u celineysa kharashaadkii uu galay.

Qeybta ayaa si caadi ah u adeegsata Adeegyada Farsamo ee Wasaaradda Arimaha Dhaqaalaha baaritaanka galalka kala duwan ee bixinta amaahda muddada dhexe iyo midda muddada-dheer ah.

**Qod. 10**

Awoodaha lagu saxeexay magaca Qaybta waa isla mid kuwa logu xusay Xeerka Bangiga Amaahda Soomaaliyeed.

**Qod. 11**

Sanaadka maaliyadda, ee Qeybtu, wuxuu bilaabmayaa 1-da Janaayo wuxuuna dhammaanayaa Diseembar 31st.

Sannad-maaliyadeedka koowaad wuxuu bilaabmaa taariikhda Abriil 10, 1959 wuxuuna xirmayaa 31-ka Diseembar, 1959.

Miisaaniyadda maaliyadeed ee Qaybta, oo ay ansixiyeen Golaha Maamulka, waxaa lagu lifaqayaa miisaaniyadda Bangiga Amaahda Soomaaliyeed.
Faa'iidada sanadlaha ah ee saafiga ah ayaa loo kala qaybinayaa sida soo socota:

a) saddex meelood saddex meel sanduuqa keydka;
b) inta soo hartay oo ah faa iido-qaybsi ahaan la siinayaa ka-qaybgallada (saamileyda) ugu badnaan 5%;
c) Lacagta dheeraadka ah waxaa loogu deeqi doonaa sameynta “Sanduuq Keyd” gaar ah oo loo adeegsado waqti ka waqti iyadoo lagu bixinayo góaan uu soo saaro Golaha Maamulka.

**Qod. 12**

Qaybtu waxa ay hoos imaaneysaa kontoroolka Guddiga Korjoogteynta oo ka dhisan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha iyadoo loo eegayo sharciga nr. 10 ka mid ah 30 Sebtember 1956.

Guddigani wuxuu leeyahay xilka ah in uu Korjoogteyn ku sameeyo waxqabadka Qaybta ee xagga dhowritaanka (u-hoggaansanka) dabbaqidda sharciyada hayadeed iyo Sharci. Qaybty (Ayadu) waxa ay leedahay awwdo ballaaran, ee kormeer iyo kontorool ay ku dul-leedahay hawlgallada xisaabinta siyaadada iyo susqaanka qaybta.

**Qod. 13**

Qaybtu waa in ay u dirto Guddiga Korjoogteynta iyo Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha, dokumeentiyada soo socda:

a) seddexdii biloodba mar, bisha xigta gudaheeda, xaalada xisaabaadka dhamaadka saddex-biloodka;
b) iyo afar bilood gudahood laga bilaabo xiritaanka sannad-maaliyadeedka, warbixinnada Golaha Maamulka iyo Guddiga Hantidhawrrada iyo miisaaniyadda xisaab-xirka sannadlaha ah oo la socdaan lifaaqyada la xiriira. Warbixinta Golaha Maamulka waa inay muujiyaan waxyaabaha uu ka midka yahay barnaamijka waxqabadyada Qaybta;
c) ugu yaraan saddex maalmood ka hor taariikhda shirka qabsoomay, ogeysiiska kulanka Golaha Maamulka iyo Guddiga Fulinta, oo la socdo (wehliyo) nidaamka hawl-maalmeedka;
d) lix maalmood oo shaqo gudahood, ee kulanka qabsoomay, nuqulka maxdarka (dood-qoraaleedka) la xiriira.

Ogeysiiska kowaad, ee ku xusay faqradda b) ee qodobkan waa in lagu sameeyaa ugu dambayn 31 Disember 1959.

**Qod. 14**

Guddiga Korjoogteyntu waxa uu kormeerro xilliyeed iyo kuwo aan caadi ahayn ku sameyn karaa Qaybta, taas oo ay tahay (ku khasban) in ay qofka u-xisaaran kormeerka siiso macluumaad kasta soona bandhigto dhammaan diiwaannada, qoraallada iyo wixii dokumentiyo ah oo laga codsado (dalbado).

**Qod. 15**

Asaga oo ka shidaalaadanaya soo-jeedinta Guddiga Korjoogteynta iyo kaddib ráyiga Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, dhegeystayna Golaha Wasiirrada, Maamuluhu wuxuu amri karaa baabiínta iyo in xaraash la geliyo oo uu fulinayo Guddi Xaraash oo uu asagu magacaabayo marka ay jiraan xaaladaha soo socda:

a) marka la xaqiijiyo in ay jiraan khaladaadsanaan culus iyo ku-xadgudubyo Sharci, Xeer-nidaamyeyaal ama axkaam kale ee nidaamisa maamulka Qeybta;
b) markii la xaqiijiyo in ay jiraan khasaarooyin galaafanaya, ka sokow sanduuqa keydka, haddiba la sameeyo, in ka badan kala-bar hantida hartay ee Qaybta;
c) markii la xaqiijiyo u-suubanaan laáanta (u-qalmid laáanta9 Qaybta in ay gaarto ujeeddooyinkeeda.

Haddii ay dhacdo baabiínta Qaybta, Maamulaha Soomaaliya, asaga oo ka-shidaal-qaadanaya soo-jeedinta Wasiirka Dhaqaalaha, dhegeystayna talada Golaha Wasiirrada, wuxuu Xeer kiisa ah ku amarayaa u-wareejinta hantida saafiga ah, ee Qaybta, ujeeddo dan guud ah.

Wasiirka

**Xaaji Faarax Cali Cumar**